



Waxyaalahaan ayey tahay inaad ogaato xagga Beerta Magaalada Lund 30/4

Habeenka Walburjis, 30/4, dhallinyaro badan ayaa isugu timaada Beerta Magaalada Lund. Wax marka hore ahaan jiray dhaqan ay lahaayeen ardada Jaamacadda ayaa wuxuu noqday baashaal socda maalin dhan ilaa iyo 3 galabnimo oo ah wakhtiga beerta la nadiifiyo oo loo diyaariyo habeenimada. Dhallinyaro ka timaada meelo ka baxsan Lund ayaa xitaa xiiseysa halkaan.

Dabaaldega dhaqanka Walburjis ee Beerta Magaalada wuxuu bilowdaa 08.00 fiidnimo. Heeso iyo dabshidka Walburjis ayeynu ku soo dhaweyneynaa gu'ga. Dabaaldeg dhaqameed wuxuu xitaa ka dhacayaa dhawr meel oo kale oo ka mid ah degmada Lund.

Sanadkii la soo dhaafay waxaa Beerta Magaalada 30/4 isugu yimid qiyaastii 25 000 oo dhallinyaro ah. Waa ciriiri, dad badan ayaa sakhraansan, waana ay fududahay inay dhibaato dhacdo. Sanad walba dad badan ayaa waxaa la soo gudboonaada dhac, xatooyo, jirdil ama in khamri lagu sumoobo. Beerta Magaalada waxaa joogaya ciidan weyn oo boolis ah oo caawimo ka helaya mutadawiciin boolis ah, koox kalkaaliyeyaal ah, shaqaale baashaaliya dhallinyarada iyo waayeel kale. Dadkaasi waxay si gaar ah dhallinyarada aadka u yaryar uga ilaalinayaan khamriga iyo maandooriyeyaal kale. Waxaa laga yaabaa in boorsadaada la fatasho, khamriga la daadiyo, qofka ku xadgudba sharciga ama dagaal ka qeybgalana booliska ama adeegga bulshada ayaa dhici karta inay



diiwaangeliyaan. Haddii waxyaalahaas mid ka mid ah ay dhacaan, da'daaduna ay ka yar tahay 18-jir, waxaa lala xiriiri doonaa waalidkaaga ama cidda kale ee kaa mas'uulka ah.

Haddaad maalintaas tageyso Beerta Magaalada, xasuusnow:

- inay mamnuuc tahay in beerta khamri lagu cabbo haddaad 20-jir ka yar tahay.
- inay mamnuuc tahay in la sito ama in la isticmaalo nooc kasta oo mukhaddaraad ah.
- in dabogal kasta oo faroxumeyn ah uu mamnuuc yahay oo dacwo laga gudbinayo. Dabogal faroxumeyn wuxuu tusaale ahaan noqon karaa in qof gacmaha lala galo hab uu qofkaasi dhibsado ama lagu yiraahdo erayo jinsi oo sharaf-dhac ah. Qof kasta ayey dhibaato ku dhici kartaa, jinsiga uu doono ha ahaadee. Ilaali saaxiibkaa oo is caawiya.
- inay beerta ka jiraan afar meelood– guduud, cagaar, huruud iyo buluug – ee warbixin laga heli karo ee ay joogaan shaqaale dadka caawiya. Halkaas biyo xitaa waad ka soo shuban kareysaa.
- in saabaanka, baaskiilada iyo dhalooyinka ay ka mamnuucan yihiin beerta. Ka taxadar dhirta iyo xaywaanka!
- in istimaalka telefonada gacanta uu adkaan karo marka dad sidaas u badan ay beerta joogaan. Sii cayima meel aad ku kulantaan.
- in magaaladu ay cariiri noqoneyso, siiba adigaaga doonaya inaad raacdo tareen ama bas. Wakhti hore soo dhaqaaji haddaad safreyso. Boolis iyo waardiye ayaa jooga maxaddooyinka badidood.

